



**Dowladda Federaalka Soomaaliya  
Hay'adda Istaatiskada Qaranka Soomaaliya**

Mashruuca Dhisidda Hannaanka Istaatistikada iyo Qorsheynta Dhaqaalaha ee Soomaaliyeed  
(P171160)

**Qorshaha Kaqeybgelinta Daneeyaha (SEF)**

**LOOGU TALAGALAY SHAACIN**

SITEMBAR, 2020

## Jadwalka Tasmada

<u>I. Horudhac .....</u>	<u>2</u>
<u>II. Koobista Kagebgelintii Hore ee Daneeyaha.....</u>	<u>2</u>
<u>III. Aqoonsashada iyo Falanqeynta Daneeyayaasha .....</u>	<u>3</u>
<u>IV. Barnaamijka Kageybgelinta Daneeyaha.....</u>	<u>5</u>
<u>V. Dhigaalada iyo Mas'uuliyadaha.....</u>	<u>7</u>
<u>VI. Habka Cabashada .....</u>	<u>8</u>
<u>VII.Korjoogteynta iyo Ka Warbixinta .....</u>	<u>10</u>
<u>VIII. LIFAAQA 1: Koobista La-tashiga Dadweynaha (FGS).....</u>	<u>10</u>

## I. Horudhac

**Kaqeybgelinta Daneeyaha.** Iyadoo la raacayo Heerka Bulshada ee Deegaanka ee Bangiga Adduunka 10 (ESS10: *Kaqeybgelinta Daneeyaha iyo Shaacinta Macluumaadka* ), Amaahdaha ayaa looga baahan yahay inuu sameeyo oo uu hirgeliyo **Qorshaha Kaqeybgelinta Daneeyayaasha (SEP)** oo qeexaya waqtiga iyo qaababka kaqeybgelinta lala yeelanayo daneeyayaasha bilowga ilaa dhammaadka mashruuca. Qiimeynta halista bulsheed waxaa loo arkaa inay tahay ‘Dhexdhexaad’ maadaama mashruucu ku lug lahaan doono hawlaha ruurinta xogta uuna dabooli doono kooxo dhowr ah oo ay ku jiraan reer miyiga iyo barakacayeyaasha iyo kooxaha laga tirada badan yahay. Iyadoo la tixgelinayo xaaladda dalka, waxaa ka jirtaa halis hawlaha xog ururinta, gaar ahaan sahanada qoyseed, oo keeni karta inaan la helin xogta gaarkaah ee dadka noocan ah. Xog ururinta sidoo kale ma noqon karto mid jinsi ahaan wargal ah iyadoo la tixgelinayo xaaladda haliseed ee dalka sidaas darteed dukumentiyada mashruuca waxaa loogu talagalay xog ururin, falanqeyn iyo/ama la tashiga ku saabsan arrimaha la xiriira jinsiga. Warbixintani waxay faahfaahin ka bixinaysaa daneeyayaasha uu khuseeyo mashruuca iyo qabanqaabooyinka mashruuc ee ay lala sameyn doono inta lagu gudajiro diyaarinta iyo sidoo kale inta lagu gudajiro fulinta. Kahor intaadan soo bandhigin natiijooyinka kaqeybgelinta daneeyaha, **Ujeedda Hormarinta Mashruuc** iyo qeybaha mashruuca waxaa lagu tiriyay qeybaha soosocda.

1. **Sharraxaada Mashruuca.** Dhisidda Hannaanka Istaatistikada iyo Qorsheynta Dhaqaalaha ee Soomaaliyeed ayaa looga golleeyahay in lagu xoojiyo maamul wanaaga iyo awoodda Qorsheynta Qaranka, Nidaamyada Istaatistikada iyo Korjoogteynta & Qiimeynta si loo buuxiyo dulduleelada xogta istaatistikada; oo si joogto ah loo qiimeeyo, falanqeeyo loona horumariyo siyaasadahooda guud iyo waxqabadka iyo natiijooyinka barnaamijka.

2. **Qeybaha Mashruuca.** Mashruuca wuxuu leeyahay afar qaybood: (a) Qaybta falanqaynta siyaasadda iyo qorsheynta, (b) Qaybta nidaamka istaatistikada, (c) Qaybta korjoogteynta iyo qiimeynta, iyo (d) Qeaybta maareynta mashruuca si loola socdo loona kormeero hawlaha lagu daboolo qaybaha a-d.

3. **Ujeeddada Qorshaha Kaqeybgelinta Daneeyaha:** wuxuu bixiyaa qaab ku habboon la-tashiyada iyo shaacinta, Kuwaas oo iyaguna laga filayo inay abuuraan jawi isfaham oo si firfircoon ay ugu lug leeyihiin dadka uu saameeyo mashruuca iyo dhinacyada kale ee daneynaya, lana gaadhsiiyo wakhtiga ku haboon, iyo in koox hoosaad kasta la siiyo fursado ay ku soo bandhigaan ra'yigooda iyo cabashooyinkooda. Guud ahaan, SEP wuxuu u adeegaa ujeedooyinka soo socda: i) aqoonsashada iyo falanqaynta daneeyayaasha; (ii) qorsheynta hababka kaqeybgelinta iwm., habka wadaxiriirka wax-ku-oolka ah ee la-tashiyada iyo shaacinta (iii) awood u siinta madal saameyn ku leh go'aannada; (iv) qeexida doorka iyo waajibaadyada jilayaasha kala duwan ee hirgelinta Qorshaha; iyo (iv) habka xallinta cabashada (GRM).

## II. Koobista La-shaqeyntii Hore ee Daneeyaha

Lashaqaynta iyo la tashiyo ku saabsan naqshada mashruuca iyo hawlaha la qorsheeyay iyo qabanqaabooyinka fulinta ayaa lala sameeyay daneeyayaasha muhiimka ah ee hay'adaha oo ay ku jiraan hay'adaha Dawladda ee ay khuseyso, Ururrada Iskaashiga horumarineed iyo hay'adaha fulinaya mashruuca. La-shaqeyno iyo la-tashiyo ayaa lala yeeshay daneeyayaasha muhiimka ah ee la aqoonsaday sida hoos lagu soo bandhigay:

<b>La-shaqeyntii Hore ee Daneeyaha Muhiimka ah</b>	<b>Dowlada Federalka Somalia</b>
La-tashiga dadweynaha, aqoon isweydaarsiyo iyo shirar iyo shaacinta macluumaadka	Laba kulan oo la-tashi ayaa lagula yeeshay hoolka shirarka ee Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MoPIED) 15-kii iyo 16-kii Oktoobar 2019 hadba siday u kala horreeyaan. Xubno ka socda laamaha Wasaaradaha ee Mashruuca, waaxaha iyo hay'adaha Dawladda (MDAs), wakiilo ka socda rugta ganacsiga, ganacsatada, ururada haweenka, dhalinyarada, odayaasha degmooyinka Banaadir, ardayda jaamacadaha kala duwan, iyo dhinacyada kale ee sida tooska ah ama si dadban uu u saameeya Mashruuca SISEPCB.

## III. Aqoonsashada iyo Falanqeynta Daneeyaha

8. Taageeraha mashruuca, Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya (SNBS) ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (FGS) ayaa dhiirrigelin doona lashaqeyeynta waxku-oolka ah ee daneeyaha si loo dhiso kalsooni labada dhinac ah iyo kobcinta xiriir hufan oo lala yeesho ka-faa'iideystayaasha mashruuca iyo daneeyayaasha kale. Tani waxaa la samayn doonaa markay hay'adda fulinaysa mashruuca lala shaqeyo iyo kahor intaan si buuxda waxtarka mashruuca loo gaarin iyo sidoo kale waxyaabaha muhiimka ah ee mashruuca tus. inta lagu gudajiro ama la soo saarayo qalabka sahan cusub. Saameynta buuxda iyo qiimeynta halista ee daneeyayaasha waxaa loo qaban doonaa sida loogu baahdo waxaana loo cusbooneysiin doonaa si ku habboon SEP. Mashruucan wuxuu saameyn doonaa oo bartilmaameedkiisu yahay dhammaan dadka Soomaaliyeed. Sidaas awgeed kooxaha daneeyayaasha muhiimka ah waxaa loo kala saari karaa sida soo socota:

Lam	Daneeyayaasha mashruuca	Ahmiyadda ay u leeyihiin mashruuca
1	<b>Laamaha wasaaradaha FGS, waaxaha istaatistikada, wakaaladaha dawladda</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Wasaaradaha, waaxaha iyo hay'adaha dawladeed waxay udub dhexaad u yihiin guusha guud ee dhammaan heerarka kala duwan ee mashruuca. Waxay muhiim u yihiin aasaaska qaabdhismeedka guud, farsamo, sharciyeed iyo nidaam ee mashruuca iyo sidoo kale helista shaqaalaha. Iskaashiga iyo wadashaqeynga lala sameeyo hay'adaha dhexdooda ah iyo hay'adaha ka dhexeeya ayaa muhiim u noqon doona hirgelinta mashruuca iyo hawlaha ku jira qaybta koowaad. Inkastoo dhammaan hay'adaha iyo waaxaha la filayo inay qayb ka noqdaan geedi-socodka haddana waxaa jira qaar ka mid ah hay'adaha oo hoggaamin doona geedi-socodka kuwa kalena waxay ka qaybqaadan doonaan heerar kala duwan ama waxqabadyada hoose.</li> </ul>
2	<b>Dhinacyada ka-faa'iideysan doona xogta mashruucu soo saaray</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Bixinta xogta istaatistikada waa dan guud oo badanaa lagu maalgeliyo kheyraadka maaliyadeed iyo helitaanka istaatistikada la isku halleyn karo oo waqtiyeysan ee loogu talagalay danta guud ee dadweynaha ayaa fure u ah isla xisaabtanka, daahfurnaanta iyo maareynta hufan ee dawladda. Ka-faa'iideystayaasha mashruucan waxaa ka mid ah ururrada is-dhexgalka gobolka, ganacsiyadda dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay, bulshada rayidka ah, ururrada iskaashiga horumarineed, iyo</li> </ul>

Lam	Daneeyayaasha mashruuca	Ahmiyadda ay u leeyihiin mashruuca
		guud ahaan dadweynaha.
3	<b>Dadka ka-faa'iideysan doona shaqaalaynta la xiriirta mashruuca</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Mashruuca wuxuu bulshada u abuuri doonaa fursado shaqo ama ganacsi iyadoo loo marayo hawlgelinta shirkadaha iyo tala-bixiyeyaal iyo shaqaalaynta hawlwadeenada goobta iyo tirokoobeyaal si loo ururiyo xogta.</li> </ul>
4	<b>FMS iyo Dawladda hoose (Waaxaha Dawladda Hoose; Golaha Dawladda Hoose; Xafiisyada degmooyinka; iyo Booliska Degmooyinka)</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Hay'adaha dawladda hoose waxay ilaaliyaan xuquuqda dadka deggan aagga mashruuca waxayna metalaan bulshada deegaanka. Mashruuca ayaa si dhow ula shaqeyn doona iyaga.</li> </ul>
5	<b>Hay'adaha Aan Faa'ido Doonka Aheyn (NGOs) ee caalamiga ah iyo hay'adaha deeqaha bixiya ee laba geesoodka ah</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Mashruuca waxaa la fulin doonaa iyadoo iskaashi dhow lala yeelan doono ururrada iskaashiga horumarineed. Statistics Sweden ayaa horay u oggolaatay inay la-shaqeyso kooxda. Si looga fogaado laba jeer qabashada dadaallada loona dardargeliyo geedi-socodka, kooxdu waxay sii wadi doontaa inay ku dadaasho la-shaqeynta ururrada iskaashiga horumarineed.</li> </ul>
6	<b>Dadka nugul iyo kooxaha barakacayaasha ah</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>SIHBS waxaa ku jiri doona barakacayaasha iyo reer miyiga iyo sidoo kale kooxaha kale ee nugul iyo kuwa la hayb sooco marka loo geeyo qoysaska Soomaaliyeed ee qeybta ka ah munnada dadweyne ee laga sameeyay sawirada dayax-gacmeed.</li> </ul>
7	<b>Ururrada bulshada rayidka ah, wakiilada ka socda ganacsiyada gaarka loo leeyahay, kooxaha haweenka, iyo wakiilada danyarta ee tooska ah iyo kuwa dadban</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Dadaallada khaaska ah ee la sameeyo si loo gaaro kooxaha nugul iyo kooxaha la hayb sooco, sida barakacayaasha.</li> </ul>
8	<b>Mac'hadka cilmi-baarista iyo tacliinta</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Natijjooyinka ka soo baxa mashruucan ayuu ka-faa'iideysan doona mac'hadkan. Mac'hadyadaan ayaa ahaan doonaan kuwo muhiim u ah isticmaaleyaasha ugu dambeeya ee xogta.</li> </ul>
9	<b>Saxaafadda iyo warbaahinta</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Warbaahinta waa daneeye muhiim u ah mashruucan kaliya ma ahan inay saameyn weyn ku yeelan karaan dadka deegaanka, balse sidoo kale waxay waxtar u yeelan karaan faafinta macluumaadka la xiriira mashruuca iyo warbixinnada ku saabsan saxnimadiisa. Raadiyaha, Telefishanada ayaa aagga laga heli karaa. Raadiyaha waa habka ugu wax-ku oolka badan ee lagu gaarsiiyo macluumaadka aagga.</li> </ul>

#### **IV. Barnaamijka Kaqeybgelinta Daneeyaha**

**Istaraatiijiyadda shaacinta macluumaadka.** Kaqeybgelinta daneeyaha ee micnaha leh ayaa ku xiran macluumaadka waqtiyeysan, la heli karo, oo la fahmi karo. Ka dhigida macluumaadka la xiriira mashruuca mid lagu heli karo sida ugu dhaqsaha badan gudaha wareegga mashruuca iyo inay heli karto qaab, nooc, iyo luqad ku habboon koox kasta oo daneeyaye ah waa muhiim. Jadwalka soo socda wuxuu muujinayaa istaraatiijiyada shaacinta macluumaadka ee heer kasta ee mashruuca. Noocyada lagu bixiyo macluumaadka waxaa ka mid noqon kara daabacaadda bandhigeed, soo-koobitaano aan farsamo ahayn, waraaqaha yaryar ee mashruuca, iyo buug-yareyaal, iyadoo ku xiran tahay baahiyaha daneeyaha.

11. Ka wadashaqeynta mashruuca waxay u badan tahay inuu ka dhexeeyo dhinacyada xiisaynaya, inta badan isticmaaleyaasha xogta iyo soosaareyaasha sida Waaxaha iyo Hay'adaha Dawladda (MDA), Hay'adaha Aan Faa'ido Doonka Aheyn (NGO), Ururrada Bulsheed (CBO), Jaamacadaha, hay'adaha cilmi-baaris, warbaahinta iwm Marka ay suurtagal tahay, kaqeybgelinta daneeyaha waxay ka-faaiidaysan doontaa qaab-dhismeedyada wadashaqeynta jirta. Habka kaqeybgelinta wuxuu noqon doonaa taxaneheer sare ah iyo hawlgalin farsamo, kulan iyo kulano shaqo oo lala yeesho dhigga farsamo ee SNBS iyo dhinacyada kale ee daneynaya iyo aqoon isweydaarsiga maalinta oo dhan socda oo lala yeesho saraakiisha farsamada ee ka socota hay'adaha Dawlada kuwaasoo ah daneeyeyaasha ugu muhiimsan ee maareynta istaatiikada. Su'aalo xog ururin oo loogu talagalay SIHBS iyo sahannada IBS si loo cabbiro qanacsanaanta isticmaalaha ayaa laga sameyn doonaa baahiyaha xogta iyo tayada. Wadiiqooyinka kaqeybgelinta waxay tixgelin siinayaan luqadda la adeegsaday, baahida turjumaadda iyo baahiyaha kale ee khaaska ah ee kooxaha gaarka ah sida bulshada nugul. Inta lagu gudajiro hirgelinta SIHBS, tababaro iyo kulano wacyigelinta kor loogu qaadayo ayaa laga sameyn doonaa tuulooyinka halkii laga sameyn lahaa xarumaha dawladda hoose si loo hubiyo kaqeybgalka sare ee dadka la bartilmaameedsaday. Wadahadalada kooxeed ee si gaar ah diirada loogu saarayo kooxaha nugul/barakacayaasha ayaa sidoo kale loo saadaalinayaa sida ugu haboon.

	<b>Daneeyaha</b>	<b>Wadiiqooyinka Kaqeybgelin</b>	<b>Imisa jeer</b>	<b>Ujeeddo</b>
1	Laamaha wasaaradaha, waaxaha istaastikada, wakaaladaha dawladda	Kaqebgelinta isxigxigta ee heerka sarreeysa iyo farsamo, kulanka iyo kulannada shaqo ee lala yeesho dhigga farsamo ee SNBS iyo dhinacyada kale ee daneynaya iyo aqoon isweydaarsiga maalinta oo dhan socda ee lala yeesho saraakiisha farsamada ee ka socota hay'adaha Dawlada kuwaasoo ah daneeyayaasha ugu muhiimsan ee maareynta istaastikada	Haddii loo baahdo	Wadaagista macluumaadka, dib-u-eegista, ansixinta iyo raadinta taageerada Si loo hirgeliyo qaybaha mashruuca Si la iskula socodsiiyo wax ku saabsan guulaha mashruuca.
2	Dhinacyada ka-faa'iideysan doona xogta mashruucu soo saaray	Doodaha shirarka: waaxda, dawladda iyo qofka u xilsaaran. Shirarkaan /kullanadaan waxaa loogu talagalay inay kiciyaan iskaashi iyo jawaab helid.	Xilliga qaabeynta iyo hirgelinta mashruuca	Si kor loogu qaado wacyiga, loo bixiyo talooyin iyo ururinta jawaab-celin
3	Dadka ka-faa'iideysan doona shaqaalaynta la xiriiirta mashruuca	Kulamada dadweynaha/bulshada, aqoon isweydaarsiyada, shirarka fool-ka-foolka ah. ololeyaasha wacyiga	Inta lagu gudajiray hirgelinta SIHBS	Si loo hubiyo kaqebgelinta dadka saboolka ah iyo nugul. Soo bandhigida mashruuca iyo geedi-socodka GRM



4	Dawladda hoose (Waaxaha Dawladda Hoose; Golaha Dawladda Hoose; Xafiisyada degmooyinka; iyo Booliska Degmooyinka)		Xilliga qaabeynta iyo hirgelinta mashruuca	Si la iskula socodsiiyo wax ku saabsan guulaha iyo caqabadaha mashruuca Si loo helo talobixin ka timaadda daneeyayaasha iyo jawaab-celinta loo maro daneeyayaasha Soo bandhigida mashruuca iyo geedi-socodka GRM
5	Hay'adaha Aan Faa'ido Doonka Aheyn (NGOs) ee caalamiga ah iyo hay'adaha deeqaha bixiya ee laba geesoodka ah	Doodaha shirarka: waaxda, dawladda iyo qofka u xilsaaran. Shirarkaan /kullanadaan waxaa loogu talagalay inay kiciyaan iskaashi iyo jawaab helid.	Xilliga qaabeynta iyo hirgelinta mashruuca	Wadaagista macluumaadka, dib-u-eegista, ansixinta iyo raadinta taageerada
6	ururrada bulshada rayidka ah, wakiilada ka socda ganacsiyada gaarka loo leeyahay, kooxaha haweenka, iyo wakiilada danyarta ee tooska ah iyo kuwa dadban iyo kooxaha nugul iyo kuwa la hayb sooco	Doodaha shirarka: waaxda, dawladda iyo qofka u xilsaaran. Shirarkaan /kullanadaan waxaa loogu talagalay inay kiciyaan iskaashi iyo jawaab helid.	Xilliga qaabeynta iyo hirgelinta	

7	Mac'hadka cilmi-baarista iyo tacliinta	Doodaha shirarka: waaxda, dawladda iyo qofka u xilsaaran. Shirarkaan /kullanadaan waxaa loogu talagalay inay kiciyaan iskaashi iyo jawaab helid.	Xilliga qaabeynta iyo hirgelinta mashruuca	Wanaajinta faafinta macluumaadka iyo hirgelinta mashruuca
8	Saxaafadda iyo warbaahinta	Doodaha shirarka: waaxda, dawladda iyo qofka u xilsaaran. Shirarkaan /kullanadaan waxaa loogu talagalay inay kiciyaan iskaashi iyo jawaab helid.	Xilliga qaabeynta iyo hirgelinta mashruuca	faafinta macluumaadka la xiriira mashruuca

## V. Dhigaalada iyo Mas'uuliyadaha

13. **Waaxda Hirgelinta Mashruuca (PIU).** Waaxda PIU ee FGS ayaa lahaan doontaa mas'uuliyadda maareynta mashruuca, iskuxirka guud ee fulinta mashruuca. PIU waxaa la dejin doonaa SNBS dhexdeeda si loo maareeyo kheyraadka dhaqaalaha. PIU waxaa ka shaqeyn doona isuduwaha mashruuca iyo sidoo kale takhasusleyaasha maareynta dhaqaalaha (FM), iibka, macluumaadka iyo tiknolojiyada wadaxiriir (ICT), maareeyaha farsamo, korjoogteynta iyo qiimeynta (M&E), iyo xoghayaha. Qaybtan mashruucan ka tirsan waxay bixin doontaa maalgelinta hawlahaas iyo fulintooda. Hirgelinta guud iyo kormeerka qorshaha kaqeybgalinta daneeyaha waxay mas'uuliyad ka saarnaan doontaa PIU. Mas'uuliyadda tooska ah ee hirgelinta waxaa loo xilsaari karaa takhasuslaha Korjoogteynta & Qiimeynta (M&E) ama waxaa loo shaqaaleyn karaa talo-bixiye dhowra muddo-gaaban. Shakhsiyaadkaan waxay xaqiijin doonaan in ujeedooyinka qorsheyaasha la fuliyo oo si guul leh loo hirgeliyo qorshaha iyadoo loo qoondeynayo kheyraadka lagama maarmaanka u ah hirgelintiisa.

14. **Kheyraadka Miisaaniyadeed ee loogu talagalay kaqeybgelinta daneeyaha.** Miisaaniyad ku filan kaqeybgelinta daneeyaha ayaa loo qoondeyn doonaa guud ahaan kharashka mashruuca, oo ay ku jiri doonaan kharashka abaabulka shirarka, aqoon isweydaarsiyada iyo tababarada, shaqaalaynta hawlwadeenada, booqashooyinka goobaha, turjumaadda iyo daabacaadda agabyada ku habboon iyo Habka xallinta cabshada (GRM)-yada shaqeynaya.

#### **VI. Habka Maaraynta Cabashooyinka**

Wadiiqada Cabashada Faallooyin iyo cabashooyin kasta ee la xiriira mashruuca waa la soo gudbin karaa iyadoo loo marayo qaabab kala duwan oo ay ku jiri karaan fool-ka-fool, telefoon, farriin gaaban, boostada, sanduuqa talo soojeedinta ee iimaylka.

Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya (SNBS) Iimaylka: <a href="mailto:complaints.sisepcb@nbs.gov.so">complaints.sisepcb@nbs.gov.so</a> Telefoonka: 2137

15. **Geedi-socodka Maareynta Cabashada** Inkastoo mashruucu loo asteeyay inuu yahay mashruuc leh halis dhexdhexaad ah, haddana mashruuca waxaa laga yaabaa inuu yeesho cawaaqib aan la fileynin –khatarta ah in uu sii xumeeyo qaababka ka saarista ee jira ama xiisadaha u dhexeeya kooxaha dareemaya inay si hoose/khaldan loo metelo. Si loo hubiyo in si habsami leh loo hirgeliyo Mashruuca isla markaana waqtiyeysan oo wax-ku-ool ah looga hadlo dhibaatooyinka lala kulmi doono inta lagu gudajiro hirgelinta, oo ay ku jiraan tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah yareynta iyo ka fogaanshaha halista, waxaa la sameeyay Habka Xallinta Cabashada (GRM) kaasoo u suurtagelinaya Mas'uuliyiinta Mashruuca inay wax ka qabtaan cabashooyinka daneeyayaasha Mashruuca oo ay ku jiraan ka-faa'iideystayaasha. SNBS waxay mas'uul ka noqon doontaa xallinta dhammaan arrimaha la xiriira hawlaha mashruuca iyadoo la raacayo sharciyada FGS iyo Bangiga Adduunka iyo Heerarka Bulshada iyadoo loo marayo Habka Xallinta Khilaafaadka (GRM) kaasoo qeexaya geedi-socodkiisa waana la heli karaa oo loo heli karaa dhammaan daneeyayaasha.

16. **Dhisida Wacyiga Habka Xallinta Cabashada (GRM).** PIU waxay marka hore warbixin ka siin doontaa dhammaan hawl wadeenada xafiiska mashruuca, iyo shaqaalaha Wasaaradda hirgelinaysa mashruuca, habka cabashada ee Mashruuca waxayna u sharrixi doonta habraacyada iyo qaababka loo adeegsan doono oo ay ku jiraan habraacyada warbixinta. Qofka loo qoondeeyey dhawrista ee kamidka ah PIU wuxuu warbixin ka siin doonaa daneeyayaasha kale Habka Xallinta Cabashada ee Mashruuca, wuxuuna sharrixi doonaa habraacyada iyo qaababka loo isticmaali doono oo ay ku jiraan habraacyada warbixinta. Ololeyaal wacyigelin ah ayaa la qaban doonaa iyadoo lagu bartilmaameedsanayo shaqaalaha mashruuca iyo daneeyayaasha kale si loogu wacyigeliyo dadka helitaanka habka. Dhexdhexaadino kala duwan ayaa la isticmaali doonaa. GRM ayaa sidoo kale lagu soo daabici doonaa mareegta SNBS [www.nbs.gov.so](http://www.nbs.gov.so) oo muujinaysa jiritaanka habka iyo lambarka telefoonka, iimaylka iyo cinwaanka qofka loo xil saaray inuu la tacaalo cabashooyinka la soo sheego. GRM waxaa loo turjumi doonaa si maxalliga ah iyo si aan rasmi ahayn haddii la go'aamiyo in loo baahan yahay.

17. Mashruucu wuxuu ujeedkiisu yahay inuu cabashooyinka wax uga qabto tallaabooyinka soo socda iyo waqtiyada tilmaaman:

	<b>Tallaabooyinka wax looga qabanayo cabashada</b>	<b>Jadwalka waqtiga*</b>	<b>Mas'uuliyadda</b>
1	Qabashada, qorista iyo qirida cabashada si qoraal ah.	Laba maalmood gudahooda	Isuduwaha Mashruuca PIU
2	Baaritaanka iyo ogaanshaha waxay salka ku hayso cabashada; Marka cabashada aan la aqbali karin (tusaale ahaan, cabashooyinka aan la xiriirin mashruuca), sababta diidmada waa in si cad loogu sharaxaa ashtakoodaha.	Saddex maalmood gudahooda	Isuduwaha Mashruuca PIU
3	GRC ayaa tixgelin doonaan qaababka wax looga qabto cabashada.	Saddex maalmood gudahooda	Gudiga Xallinta cabashada GRC
4	Hirgelinta xallinta kiiska ama ashtakoodaha aan qanacsaneyn wuxuu ka raadin karaa sixid hanaanka racfaan qaadashada.	Saddex maalmood gudahooda	Gudiga Xallinta cabashada GRC.

5	Qorista cabashada iyo tallaabooyinka la qaaday iyo u gudbinta warbixinta PIU.	Saddex maalmood gudahooda	Isuduwaha Mashruuca PIU
6	U gudbinta kiiska nidaamka garsoorka qaranka, hadduu ashtakoodaha sidaasi rabo.	Bil gudaheeda	Qofka cabashada qabo
* Haddii waqtigan la qaban waayo, ashtakoodaha ayaa lagu wargelin doonaa qoraal ahaan in GRC u baahan yahay waqti dheeraad ah.			Isuduwaha Mashruuca PIU

43. **Cabashooyinka la xiriira Rabshadaha Ku Salaysan Jinsiga (GBV).** Si looga fogaado halista faquuqida, ka sii darida waxyeellada dhimireed/maskaxeed iyo aargoosiga suurtagalka ah, GRM wuxuu yeelan doonaa qaab kale oo xasaasi ah oo loo wajaho kiisaska la xiriira GBV waana in wax laga qabtaa iyadoo la raacayo ogolaanshaha wargalka ah ee ashtakoodaha. Marka kiis noocaas ah la soo sheego, ashtakoodaha, waa in la siiyaa macluumaadka ku saabsan iyo caawinta la heli karo haddii la codsado: taageero caafimaad iyo mid nayadeed oo qarsoodi ah oo habboon, hoy degdeg ah, iyo wixii adeegyada kale ee lagama maarmaanka ah sida ugu habboon ee ay ka mid yihiin kaalmada sharciyeed. Dhammaan shaqaalaha iyo dadka u xilsaaran GRM waa in lagu wargeliyaa in haddii iyaga kiis GBV loo soo sheego, macluumaadka keliya ee ay tahay inay caddeeyaan waa inay dhacdada ku lug leedahay shaqaale ka tirsan mashruuca, siday wax u dheceen, da'da iyo jinsiga ashtakoodaha iyo haddii badbaadaha/ashtakoodaha loo gudbiyay waaxda bixinta adeegga. Haddii shaqaale ka tirsan mashruuca ku lug leeyahay dhacdada waa in isla markiiba la wargaliyaa Maareeyaha Barnaamijka Qaranka kaasoo bixin doona hagiis dheeraad ah kadib markuu la tashado Bangiga Adduunka.

## VII. Korjoogteynta Ka Warbixinta

22. **Korjoogteynta iyo Kormeerka Qorshaha Kaqeygelinta Daneeyaha.** Hirgelinta guud iyo kormeerka qorshaha kaqeybgalinta daneeyaha waxay mas'uuliyad ka saaraan doontaa PIU. Mas'uuliyadda tooska ah ee fulinta waa mas'uuliyadda maareeyaha mashruuca iyo Takhasuslaha dhowra mashruuca. Shakhsiyaadkaan waxay xaqiijin doonaan in ujeedooyinka qorsheyaasha la fuliyo oo si guul leh loo hirgeliyo qorshaha iyadoo loo qoondeynayo kheyraadka lagama maarmaanka u ah hirgelintiisa.

23. **Tilmaameyaasha** . SNBS iyadoo u marayso PIU waxay ururin doontaa xogta aasaasiga ah, iyadoo la adeegsanaayo habab tiro iyo tayo leh waxayna ka warbixin doontaa tilmaameyaasha soo socda:

- a. Tirada hay'adaha dawladda, ururada bulshada rayidka ah, ganacsiyada gaarka loo leeyahay iyo kooxaha kale ee daneeyayaasha ah ee ku lugta lahaa wajiga fulinta ee mashruuca saddexdii biloodba mar. Qaabka xaqiijinta: Diiwaan-shireedyada iyo Warbixinnada la-tashiyada ee la kala saaray iyadoo la eegayo waaxda.
- b. Tirada dadka (jinsiga iyo da'da la kala saaray) ee ku lugta lahaa wajiga fulinta mashruuca (seddexdii biloodba mar) Qaabka xaqiijinta: Diiwaan-shireedka, warbixinnada iyo dukumentiyada kale ee la-tashi.
- c. Tirada kaqeybgelinta (tus. kulan, aqoon isweydaarsiyo, jinsiga iyo da'da la kala saaray ee kaqeybqaateyaasha wadatashiyada) ee lala yeesho daneeyayaasha inta lagu gudajiro wajiga fulinta mashruuca (sanadkiiba mar) Qaabka xaqiijinta: Diiwaan-shireedka, warbixinnada iyo dukumentiyada kale ee qorshaha kaqeybgelinta daneeyayaha.
- d. Boqolleyda daneeyayaasha ku qiimeeya inay ku qancsan yihiin heerka aragtidooda iyo cabashooyinkooda lagu tixgeliyo mashruuca (dhinaca mas'uulka ka ah cabbirka tilmaamtan waa SNBS oo tani waxaa fulin doona PIU si ay u qabtaan Qiimeynta Muddada dhexe iyo Dhammaadka Mashruuca). Qaabka xaqiijinta: Qiimeynada saamaynta iyo qanacsanaanta ka qeyb ahaan qiimeynta mashruuca.

23. **Dib u wargalinta daneeyayaasha** . Waxqabadka mashruuca ee la qiimeeyay iyadoo loo marayo hawlaha kormeerka ayaa dib loogu soo sheegi doonaa daneeyayaasha inta lagu gudajiro wajiga hawlgalka iyo joogteynta. PIU ayaa mas'uul ka noqon doonta inay hubiso in dhammaan warbixinnada habboon la wadaago iyadoo loo marayo qaababkan dawladeed ee kor lagu qeexay. .Casharrada laga bartay kormeerka waxay sidoo kale gacan ka geysan doonaan naqshadeynta mashaariicda mustaqbalka waxaana lala wadaagi doono daneeyayaashooda.

#### **VIII. LIFAAQ 1: Koobista La-tashiyada Dadweynaha (FGS)**

**WARBIXINTA KOOBAN EE KULLANNADA WADATASHI EE LOO QABTAY  
DUKUMENTIYADA DHAWRISTA EE DEEGAANKA IYO BULSHADA:  
QAABDHISMEEDKA KAQEBGELINTA DANEEYAHA  
IYO  
HANAANKA MAAREYNTA SHAQAALAHA  
EE MUQDISHO, SOOMAALIYA.  
*Oktoobar 15-16, 2019.***

**Horudhac.**

Laba kulan oo la-tashi ayaan kula yeelanay hoolka shirarka ee Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MoPIED) 15-kii iyo 16-kii Oktoobar 2019 Waxaan la shaqeynay xubno ka socda laamaha Wasaaradaha ee Mashruuca, waaxaha iyo hay'adaha Dawladda (MDAs), wakiilo ka socda rugta ganacsiga, ganacsatada, ururada haweenka, dhalinyarada, odeyaasha degmooyinka Banaadir, ardayda jaamacadaha kala duwan, iyo dhinacyada kale ee sida tooska ah ama si dadban uu u saameeya Mashruuca SISEP, waxaan sidoo kale booqanay xafiisyo kala duwan si aan ula shaqeyno iyaga.

**Ujeedooyinka La-tashiyada**

- Isbarashada kaqeybgalayaasha, ujeedooyinka Horumarinta Mashruuca iyo qeybaha uu ka kooban yahay.
- La-tashiga daneeyayaasha kala duwan ee mashruuca wax ku saabsan dukumentiyada dhowrista ee bangiga adduunka ee mashruuca.
- Ka wadhadalka qorshaha maareynta Shaqaalaha iyo qaabdhismeedka kaqeybgelinta daneeyaha ee qabyo qoraalka ah iyo saameynta mashruucu ku leeyahay daneeyayaasha mashruuca dhexdooda.
- Helida aragtiyada iyo jawaab-celinta kaqeybgalayaasha ee ku saabsan dukumentiyada dhawrida, habraacyadda Maareynta Shaqaalaha, qorshaha ka qeybgalinta daneeyaha (LMP, SEF) ee qabyo qoraalka ah.

**Habka La-tashiga.**

Xubnaha loo xilsaaray ee ka socda SNBS ayaa loo abaabulay la-tashiga Dadweynaha, kaqeybgalayaasha waa la casuumay oo si dhow ayaa loola xiriiray intay socdeen la-tashiyada.

Kulan ayaa xubnaha ka socda ganacsatada, haweenka, dhalinyarada, aqoonyahanada iyo bulshada maxalliga ah lagula yeeshay goob aad u macquul ah oo la gaari karo. Xubnuhu waxay si furan uga wadahadleen dukumentiyada dhawrida ee qabyo qoraalka ah (Qaabdhismeedka Kaqeybgelinta Daneeyaha iyo Habraaca Maareynta Shaqaalaha). Kadib markay SNBS soo bandhigeen dukumentiyada dhawrida (Qaabdhismeedka Kaqeybgelinta Daneeyaha iyo Habraaca Maareynta Shaqaalaha SEF iyo LMP) ee qabyo qoraalka ah, saameyntooda deegaanka iyo bulshada, halista la filan karo ee ku saabsan caafimaadka iyo badqabka shaqo, ku shaqeysiga carruurta, takoorka iyo faquuqa kooxaha nugul, Khataraha amni ee shaqaalaha mashruuca, kiisaska ku saleysan xadgudub ku salensan jinsiga , cabashooyinka, iyo waxyaabo kale iyo yareyntooda suurtagalka ah, iyo xeeladaha lagu maareeyo Cabashooyinka.

Qaybaha ku jira qabyo qoraalka la soo bandhigay si furan ayaa looga dooday waxaana la qabtay doodo gooni ah oo ku saabsan qorshaha maaraynta shaqaalaha iyo habsami u socodka kaqeybgelinta daneeyaha, Kaqeybgalayaasha waxaa la siiyay fursado ay nagu warsadaan su'aalo isla markaana ay ku soo bandhigaan talooyinka ay qabaan inta lagu gudajiray kalfadhiga, waxay sameysteen kooxo wayna ka doodeen, kadibna natiijooyinka iyo fikradaha ayay la wadaageen kooxaha kala duwan, fududeeyayaashu waxay sookoobeen jawaab-celinta habboon dhammaadka kulanka.

**Faallooyinka daneeyaha iyo aragtiyada ku saabsan dukumentiyada dhawrida.**

Dhammaan kaqeybgalayaasha shirarka way dhageysteen bandhigyada, dib-u-eegis ayay ku sameeyeen qabyo qoraalka waxayna ka yeesheen dood furan furitaanka dukumentiyada dhowrida ee qabyo qoraalka ah iyo saameynta ay ku leeyihiin mashruuca, waxay si xoogan u taageeraan dukumentiyada dhawrida ee qabyo qoraalka ah ee mashruuca tus. (SEF iyo LMP), waxay ka mahadceliyeen shaqada ammaanta mudan ee qorista dukumentiyada faahfaahsan ee sidaan oo kale ah iyo sida ay u ilaaliyaan bulshada iyo deegaanka ku xeeran, u hagaan arrimaha shaqaalaha isla markaana si dhakhso ah ula shaqeeyaan daneeyayaasha mashruuca. Faallooyinka ay ka bixiyeen dukumentiyada qabyo qoraalka ah ayaa ahaa kuwo faahfaahsan oo kala duwan, si kastaba ha ahaatee waxaan ku soo koobaynaa jadwalka hoose.

<b>Mawduuca</b>	<b>Aragtiyada</b>
-----------------	-------------------



<p>Guud Ahaan</p>	<ul style="list-style-type: none"> <li>• “Dokumentiga dhawrida ayaa na siisay fikrado, wacyigelin, la sameysashada xiriir daneeyayaasha mashruuca wuxuuna dejiyay heerarka bulsheed oo loogu talagalay fariin cad oo isdabajoog ah wuxuuna kor u qaadayaa daahfurnaanta”.</li> <li>• Dokumentiyada, ayaa si cad u iftiimiyay shaqada loo baahan yahay ee mashruuca, iyo dhammaan khataraha suurtagalka ah ee la xiriira mashruuca iyo hababka saxda ah ee wax looga qabanayo halista bulsheed si meesha looga saaro dib u dhaca.</li> <li>• “Hababka wadaxiriirka ee dokumentiyada qabyada ah; ayaa na siiyay wadaxiriir laba dhinacle ah wuxuuna kordhiyay hufnaanta mashruuca”.</li> <li>• “Waan ku faraxsannahay in habraacyadda Maareynta Shaqaalaha LMP-ga qabyada ah la waafajiyo sharciga shaqaalaha ee FGS iyo kuwa kale ee sharciyada caalamiga ah ee la xiriira siyaasadaha shaqada”.</li> <li>• “Waxaan rajeyneynaa fulinta mashruucan inta lagu gudajiro waqtiga mashruuca”</li> <li>• “Dokumentiyada qabyada ah waxay dhiirrigelinayaan xeelado wadaxiriir oo wax-ku-ool ah si loo wadaxiriiro si dhakhso ah”.</li> <li>• Mashruuca wuxuu hoosta ka xariiqayaa muhimada ay leedahay in la helo xog waqtiyeysan, la isku halleyn karo oo ku filan hirgelinta NDP9 iyo siyaasadaha iyo barnaamijyada kale ee Dhaqaalaha.</li> </ul>
<p>Ku shaqeysiga carruurta</p>	<p>Marka la eego xaaladda Soomaaliya, shaqaaleynta khasabka ah weli waa dariiq bilow ah oo aan la arkin xilligan, si kasta ha ahaatee shaqaaleynta carruurta ayaa ka jirta Soomaaliya, dukumintigan (LMP) wuxuu bixinayaa daryeelka iyo</p>

	<p>Dhawrida ku saabsan xuquuqda ilmaha “waxaan ka codsaneynaa FGS inay dardargeliso hirgelinta sharciyadeeda sida Heshiisyada xuquuqda ilmaha (CRC), xeerka shaqada, iyo dukumentiyada kale dhawrida ee wax-ku-oolka ah ee xuquuqda carruurta sida LMP”.</p>
<p>Gudiga Xallinta cabashada (GRM)</p>	<p>Kaqeybgalayaashu waxay iftiimiyeen muhiimada ay leedahay in xiriir toos ah lala yeesho GRMC, wuxuuna yiri “Waxaan u maleynayaa inay aad muhiim u tahay in dadka cabanaya ay xiriiraan GRC si ay ugu soo gudbiyaan dacwadiisa/cabashadeeda si waqtiyeysan”</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Waxay sharaxeen talaabooyin wax looga qabanayo cabashada ee lagu soojeedisay qabyo qoraalka SEF inay tahay mida ugu fiican kuna haboon Soomaalida, waxay la mid yihiin hanaanka maareynta cabashada ee hadda jira ee ay isticmaasho FGS waana mid ku habboon Soomaalida.</li> <li>• Geedi-socodka maaraynta cabashooyinka ayaa la mid ah midka oday dhaqameedka Soomaaliyeed ee loo adeegsado maaraynta cabashooyinka, odayaashu waxay hoosta ka xariiqeen habka loo maro cabashada si loogu hirgeliyo siday tahay iyadoo intaas dheer tahay in odayaashu ay qayb ka noqdaan dhammaan howlaha maareynta Cabashada.</li> <li>• “Marka ay ashtakoodeyaashu wax akhrin karin ama qori karin waxaa fiican in tixgelin gaar ah la siiyo” haweenka</li> <li>• “Waxaan codsaneynaa habka xallinta cabashada (GRM) in loo turjumo luuqada maxaliga ah/ Soomaaliya”</li> </ul>
<p>Takoorka la xiriira shaqada</p>	<p>Haweenka iyo kooxaha nugul waa inay la siiyo tixgelin gaar ah marka la sameynayo shaqo abuurka. “Gudaha Soomaaliya, dumarku way ka muhiimad yar yihiin ragga ku jira suuqa shaqada, “Waxaan haweenka kula talinayaa in la siiyo daryeel iyo tixgelin gaar ah oo la xiriirta fursadaha shaqo ee</p>

	mashruuca”.
Hawlwadeenada/Shaqaalaha Mashruuca	<p>“LMP ayaa caddeeyeen doorarka shaqaalaha mashruuca, waxaan rajeynayaa in dukumentigan bixin doono waddo cad oo loo maro maaraynta shaqaalaha mashruuca”.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• “Qabyo qoraalkan LMP wuxuu ka ciyaarayaa kaalin muhiim ah kala saarida doorarka iyo mas'uuliyadaha saaran shaqaalaha mashruuca”</li> </ul>
Badqabka iyo Amniga Shaqaalaha.	<p>Marka laga hadlayo Badqabka iyo amniga "Tirokoobeyaasha iyo sarkaalka goobta shaqada xilliga xog ururinta laga sameynayo aaggaga qaarkood waxay la kulmi karaan qaar ka mid ah caqabado amniga iyo khataro bulsheed in wax looga qabto marxaladda ugu horeeysa waa mid aad muhiim u ah, “Waxaan u maleynayaa in tallaabooyinka iyo yareynta halista ee hadda jira ee ay soo jeediyeen dukumentiyada dhawrida ay ku filan yihiin haddii si sax ah loo dhaqangeliyo”.</p>
Qulqulka Shaqaalaha	<p>Qulqulka shaqaaluhu ee gobollada kala duwan ee dalka iyo dibedda waa mid sarreeya</p>
Halista cafimaad ee la xarirta shaqada ee somaliya	<p>Waxaa jira halis oo la xiriirta shaqada ee Soomaaliya cimilada adag awgood ee wadanka ka jira, hase yeeshe, iyadoo la raacayo xeerka shaqaalaha Soomaaliyeed waxaa jira talaabooyin lagu yareynayo si loo hubiyo in shaqaalaha laga ilaaliyo khataraha la xiriira OHS.</p>
Shaqo Abuurka dhalinyarada	<p>Xubinta dhalinyarada ah wuxuu xoogga saaray shaqaalaysiinta iyo shaqo abuurka dhalinyarada, “Waxaan u maleynayaa inaan ku jirno liiska ugu sareeya ee kuwa ka faa'iideysan doona mashruucan, waxaan ku dhowaad nahay 70% ka mid ah bulshada, mashruucu waa inuu na siiyaa mudnaan dheeraad ah isagoo shaqo abuur u sameynayo dhalinyarada waxaana fileynaa mashruucan inuu shaqooyin</p>

	<p>badan noo abuur ”.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Xubinta dhalinyarada ah wuxuu ku celcelineysaa ahmiyada mashruucan u leeyahay shaqo abuurka dhalinyarada.</li> </ul>
GBV iyo dumarka	<p>Haweenka “Sida qoran, kiisaska GBV ee Soomaaliya way sii kordhayaan iyadoo abaaraha iyo colaadaha socda ay ka sii darayaan xaaladda jirta, haweenku ma helin taageero dhaqaale, xirfado, iyo fursado shaqo aan u baahanahay si aan uga qeybgalno mashruucan, Haweenka waxay ahayd in la siiyo qoondo markay tahay nidaamka diiwaangelinta, waxaan u baahanahay inaan qayb libaax ka qaadano maadaama aan nahay dadka ugu badan bushada</p>
Cabashada la xiriirta GBV.	<p>“Waxaan si fiican u tababarantay shaqaale/la tiriyay oo ay hagayaan qawaaniinta anshaxa inta lagu gudajiro xog ururinta waxay yaqaanaan sida loo maareeyo kiisaska la xiriira cabashooyinka GBV, waxaan mar walba u sheegnaa inay qaadaan tallaabada ku haboon oo ay si dhakhso leh u soo sheegaan kiisaska noocaas ah, iyadoo ilaalinaya sirta dhibanaha. Waxay kiiskan oo kale u gudbinayaan dadka ku haboon sida fulinta sharciga iyo adeeg-bixiyeyaasha caafimaad”.</p>
Filashada xogta mashruuca ilaa aqoonyahanka. (sida xogta SIHBS)	<p>Ardayda iyo aqoonyahanada kale waxay sidoo kale muujinayaan muhiimada ay leedahay gelitaanka iyo helitaanka xog sugan oo rasmi ah, waxay ku nuuxnuuxsadeen sida ay u dhibaatoodaan inta ay ku gudajiraan hawlhooda cilmi-baarista sababo la xiriira helitaanka xogta ee saboolnimo, ganacsi iyo xogta bulshada iyo dhaqaalaha, “waxaan taageereynaa mashruuca iyo dukumentiyada dhawrida waxaana filaynaa in laga gudbo daldaloolada xogta jirta” Ardayga.</p>
Awoodda iyo horumarinta	<p>Dhammaan xubnihii ka socday MDA-yada waxay isku</p>

kaabeyaasha istaastikada	<p>raaceen in Mashruucu u oggolaan doono dawladda inay xoojiso xirfadaha iyo awoodda shaqaalaha dawladda.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Sida ay sheegeen xubnaha ka socda wasaaradaha “mashruucu wuxuu kor u qaadi doonaa kaabeyaasha istaastikada ee hadda jira wuxuuna wanaajin doonaa u helitaanka istaastikada rasmiga ah ee dhaqan-dhaqaale ee lagu kalsoonaan karo si waqtiyeysan”.</li> <li>• Waxay xoogga saaraan muhiimada qaabdhismeedka kaqeybgelinta Daneeyaha si kor loogu qaado xiriirka ka dhexeeya isticmaaleyaasha xogta iyo soosaarayaasha iyo gaarsiinta xogta dhammaan kooxaha daneeynaya,</li> <li>• “Mashruucu wuxuu Taageerayaa dhisidda hay'adaha dawliga ah ee sharciga ah, wuxuu kobcinayaa kalsoonida dadweynaha ee ku aadan istaastikada rasmiga ah”.</li> </ul>
--------------------------	---

### **Tallooyinka Daneeyayaasha..**

Dhammaan xubnuhu waxay taageereen dukumentiyada dhwrada ee la soo bandhigay (SEF iyo LMP), waxay hoosta ka xarriiqeen muhiimada dukumentiga iyo sida ay u dhawrayaan Bulshada iyo deegaanka, ayna kor ugu qaadayaan ladnaanta aadanaha, waxay taageerayaan sida dukumentiyada qabyada ah ay ula tacaalayaan halista Bulshada ee la filan karo iyo saamaynteeda, iyo tallaabooyinka yareynta halista si looga gudbo khataraha bulshada.


- Waxay ku taliyeen in loo hirgeliyo mashruuca sida ugu macquulsan iyo muddada loo asteeyay.
- Waxay ku taliyeen in tixgelin dheeraad ah laga siiyo hirgelinta dukumintiyada qabyada ah, lana iswaafajiyo dhammaan shuruudihiisa iyo xaaladihiisa, waa dukumentii hagiis oo ilaalinaya Bulshada iyo karaamada aadanaha, iyo sidoo kale xuquuqda carruurta, barakacayaasha, haweenka iyo guud ahaan bulshada.
- Waxay ku talinayaan in la faafiyo macluumaadka mashruuca iyadoo loo marayo warbaahinta maxalliga ah maxaa yeelay inta badan waxaa lagu tiirsan yahay raadiyaha maxalliga ah iyo telefshanka ee ah halka laga helayo macluumaadka la shaacinayo.
- Waxay ku taliyeen in la helo hannaan loo wada dhan yahay inta la dhisayo Guddiga Xallinta Cabashooyinka.

- Waxay ku taliyeen in loo abuuro fursado shaqo dhalinyarada bilowga ilaa dhammaadka mashruuca.
- Waxay ku taliyeen in laga fiirsado caqabadaha amni ee heerarka mashruuca oo dhan, iyo in la qaado tallaabooyin macquul ah si loo yareeyo khataraha bulshada ee la filayo.
- Ku Lug Leh Shaqada - Takoorka: Kaqeybgalka iyo doorka haweenka ee goobta shaqada waa mid aad u xaddidan, taasoo ay ugu wacan tahay sii socoshada doorarka ciriiriga ah ee jinsiga ku saleysan iyo sinaan la'aanta sidaas darteed dhammaan kaqeybgalayaashu waxay hoosta ka xariiqeen muhiimada ay leedahay ka shaqaaleynta haweenka mashruucan.

### **Gunaanadka.**

Gabagabadii, shirarka wadatashi waxay isu keeneen daneeyayaal kala duwan waxaana loo qabtay si guul leh, ra'yi celinta guud waxay muujineysaa in taageero weyn oo loo hayo dukumentiyada qabyo qoraalka Agabka badbaadada, kaqeybgalayaasha wadatashiga waxey ku farxeen Agabka badbaadada Mashruuca, inta lagu gudajiray kulamada kaqeybgalayaashu waxay ka wadhadleen qaabdhismeedka maaraynta shaqaalaha. kaqeybgelinta daneeyaha iyo hababka loola xiriiro daneeyayaasha kala duwan. Waxay ballanqaadeen inay gacan ka geystaan oo ay taageeraan inuu guleysto mashruuca, ayna ku lug yeeshaan dadaalka yareynta khataraha bulshada ee la filan karo ee mashruuca. Waxay sidoo kale ballanqaadeen taageero aad u baaxad weyn si loogu guuleysto guud ahaan hirgelinta dukumentiyada dhawrida ee mashruuca.

**Photos were taken during the consultation**



**Annex one.**

**Somali Integrated Statistics and Economic Planning Capacity Building project  
Public Consultation Workshop on World bank Safeguard Instruments (LMP, SEP).**

**Agenda.**

**Date:** 15 October 2019.

**Venue:** Somali Chamber of commerce and Industries meeting Hall.

<b>TIME</b>	<b>DISCUSSION ITEM</b>	<b>PRESENTERS</b>
09:00 – 09: 15am	Registration	All
09: 15– 09:30 am	Welcome, Introductions and Opening Remarks	All participants
09:30 – 10:00am	Overview of the Somali Integrated Statistics and Economic Planning Capacity Building project and World banks safeguard instruments.	DNS Members
10:00 – 10:45am	Labor Management Procedures (LMP)	DNS Members
10:45 – 11: 30am	Stakeholder Engagement Framework (SEP)	DNS Members
11:30 – 12: 15am	Discussion and feedback	All participants
12:15 – 12:30pm	Wrap up and final remarks	DNS and participants.



**Annex two.**

Somali Integrated Statistics and Economic Planning Capacity Building project  
Public Consultation Workshop on Safeguard Instruments.  
Stakeholder Engagement Framework (SEP) and Labor Management Procedures (LMP)

Participants list

S/N	PARTICIPANT'S NAMES	GENDER	ORGANIZATION/INSTITUTION	TITLE
1	Muse Mohamed Osman	M	Ministry of Planning and Economic Development (MOPIED).	Director-General National Planning.
2	Abdulkadir M Arabow	M	MOPIED	Director of Monitoring and Evaluation.
3	Sakeria Harbi Ahmed	M	MOPIED	Head of Evaluation and Research.
4	Muhyadin Mohamed Ali	M	MOPIED	M&E Officer.
5	Saadiq Abdirahman Dahir	M	MOPIED	M&E Officer.
6	Mohamed Dahir Siyad	M	MOPIED	M&E Officer.
7	Muna Osman Dinle	F	MOPIED	Monitoring Officer.
8	Mohamed Abdulkadir	M	MOPIED	Research and Evaluation Office
9	Sadaam Ibrahim Husien	M	MOPIED	N/A
10	Kalid Jama	M	MOPIED	Head suction
11	Abdullahi Abdi Nur	M	MOPIED	Head Unit.

12	Sayid Ali Adan	M	DYA-local NGO	Accounting General.
13	Abdirazak Mohamed Ahmed	M	City University Mogadishu	Student
14	Ahmed Ali Haji	M	Mogadishu University	Student
15	Basra Mohamud Ali	F	City University	Student
16	Jama Hassan Omar	M	Ministry of Finance	Micro fiscal policy officer
17	Said Ismail Mohamed	M	Abdi-Asis District-Community Member	District Elder
18	Abdiqadir Dahir Ahmed	M	Wadajir-Youth	Vice-chairperson
19	Abdinasir Ahmed rage	M	Wadajir-Youth	Adm/Finance
20	Omar Abdi Nur	M	Somali Chamber of Commerce.	Operational Manager
21	Sundus Hirsi Abdi	F	Somali Chamber of Commerce	Business Reg. Unit
22	Shukri Abdi Nur	F	Benadir Women Group.	Member
23	Abdulrahim Ibrahim Mohamed	M	MoPIED	Planning officer
24	HUSSEIN ELMU GUURE	M	MoPIED	Depute Director of DNS
25	ABDISALAM YUSUF ARTAN	M	MoPIED	Head of Economic statistics
26	Abdi Nasir A. Roble	M	MoPIED	Senior Statistician.
27	Su'di Iman Mohamed	F	SEPCO	Admin/Finance